

**Sharciga lamba. 42 e 8 Juun 1972.**

**Shaqo ka Saarista Qaar ka mida Shaqaalaha Rayidka iyo Ciidamada.**

### **GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Warqadda koowaad iyo tan Labaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;  
Marka uu arkay go'aanka xukunka lamba. 23 (55 Diw.Guud) ee 3 Maajo 1972 ee  
Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Muqdisho;

Marka uu helay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka – meelmarinta lamba. SRC- 66-549  
ee 25-5-1972;

### **WUXUU MEELMARIYAY**

Xeerka soo socda:

#### **Qod. 1**

1. Laga soo bilaa 11 Maajo 1972, waxaa shaqadii laga siidaayay dhammaan shaqaalahii rayidka iyo cidaamada ee Dawladda, Wakaaladaha Dawladda, Maamulka Dawladaha Hoose ama shirkadaha ay Dawladdu qayb ka tahay, kuwaasoo Maxkamadda Badbaadada Dalka Muqdisho ay caddaysay in dacwaddoodu aanay socon karin si sharciga waafaqsan laguna siidaayay caddayn ku filan awgeed taariikhdu markii ay ahayd 3 Maajo 1972 xukunka lamba. 23, iyadoo aan meel looga dhacayn wixii xeer, nidaam ah iyo mid kale;
2. Sidaas darteed, shaqa ka saarista lagu soo sheegay faqradda koowaad ee qod. 1 ee Xeerkaan, waxaba uma dhibayso xaqa qof kasta u lahaa in uu helo mushaarkiisi muddadii uu xirnaa oo ku eg ilaa 10 Maajo 1972 iyadoo laga goynayo wixii lacago la siiyay intii lagu jiray muddadi ugu dambaysay ee xabsigooda, sidoo kale xaqiintooda si waafaqsan Xeerka ama Xeer Nidaamiyaha jira.

#### **Qod. 2**

Xeerkan waxaa lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 8 Juun 1972.

Guddoomiyaha  
Golaha Sare Kacaanka  
**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**